Tallaalka COVID-19 Waxaa Lagu Qaban Doonaa Rugaha Caafimaadka Dugsiyada Sarre Si Dhammeystiran Inta Lagu Guda Jiro Diiwaangalinta Ardayda

Ogosto 20, 2021

Qoysaska Qaaliga ah PPS,

Iyada oo si xawli ah sanad-dugsiyeedkii 2021-22 inagu soo fool leeyahay,waxaan sii wadi doonaa diyaargarowga inaan si nabadgelyo leh dib ugu furno iskuuladeena waxbarashada fasalada gudahooda lagu qaadanayo. Waxaan rabnaa inaan hubino inaad ka warqabto fursadaha soo socda sidii aad u heli lahayd tallaalka xanuunka COVID-19 mudadda lagu gudo jiro isdiiwaangalinta ardaydeena, iyada oo tallaalka laga heli karo si dhammeystiran sagaalkeena dugsi sarre.

Waxaan la shaqeyneynaa saaxiibadeena caafimaadka, mid kasta oo ka mid sagaalka dugsi sarre wuxuu qaban doonaa mid aama in ka badan oo munaasabadaha tallaalka lagu bixinayo dhismaha iskuulka inta lagu gudo jiro isdiiwaangalinta ardayda. Si aad u aragto liistada oo dhammeystiran taariikhaha iyo goobaha rugaha caafimaadka, fadlan waxaad booqataa pps.net/covid-19vaccination. Rugahani caafimaadku waxay u furan yihiin ardayda iyo xubnaha qoysaska ee da'doodu u dhaxayso 12 sanno iyo ka weyn. In aad ballan qabsataa muhiim ah. Ardayda da'doodu tahay 12 ilaa 14 sanno waxaa looga baahan yahay inay sitaa xaashida oggolaansha waalidka ama daryeelihiisa.

Waxaan u mahadnaqeynaa saaxiibadayada kuwaasi suurtagaliye rugahani caafimaad kuwaasi oo ay ka mid yihiin: Providence Health, Costco Pharmacy, Oregon Health & Science University, Portland Fire & Rescue, iyo Medical Teams International.

Tallaalku waa hubka kaliya uguna awood badan ee lagu yareynayo faafitaanka xanuunka COVID-19. Maaintii Arbacada, waxaan ku dhawaaqnay in dhammaan shaqaalaha PPS ee ku sugan dhammaan goobaha looga baahan yahay inay qaataan tallaalka. Waxaan idinka codsaneynaa dhammaantiin fadlan inaad is-tallaashaan haddii aad u qalantaan oo aydan wali si tallaalin.

Haddii aad haysaan wax su'aalo ah oo ku saabsan tallaalka, fadlan waxaad email noogu soo dirtaan halkan vaccine@pps.net. Haddaba si aad u ogaato macluumaad badan oo ku saabsan tallaabooyinka aanu qaadayno sidii aan u ilaalin lahayn nabadgelyada ardayda iyo shaqaalaha maadaama uu bilaabmayo sanad-dugsiyeedku, oo ay ka mid yihiin in dhammaan ardayda iyo shaqaaluhu xirtaan af-saabka(maaskarada) marka ay ku sugan yihiin gudaha dhismayaasha iskuulka PPS. Fadlan waxaad booqataa mareegtayada shabakada Back to School 2021 website.

Ku nasta waqtiga idiinnka haray xilliga xaggaaga, fadlan waxaan idiin rajeyneynaa nabadgelyo.